

Kalaay waxay la hadashaa dhirta

 Ursula Nafula

 Jesse Pietersen


 Abdi Muse

 Somali


 Level 2

(imageless edition)






Tani waa Kalaay. Waxay jirtaa toddoba sano. Magaceeda macnihiisa waa “midda wanaagsan” luqaddeeda, Lubukusu.




Kalaay way soo toostaa waxeyna
lahadashaa geedka liinta ah.


“Fadlan geedka liinta ahoow,
weynoow oo na sii liin badan oo
bissil.”




Kalaay waxay aadaa dugsiga. Jidka
waxay kula hadashaa cawska.
“Fadlan caws, weynoow cagaaro
oo ha qallalin.”




Kalaay waxay soo martaa ubaxyo duureed. “Fadlan ubaxyo, sii magoola, si aan timaheyga idiin saarto.”




Iskuulka, Kalaay waxay la hadashaa
geedka dhexda xerada ku yaallo.
“Fadlan geed, so saar laamo
waaweyn si aan ugu akhrisano
hooskaada.”



Kalaay waxay la hadashaa bowdka ku wareegsan dugsigeeda. “Fadlan u kora si awoodleh oo joojiya soogallida dadka xun.”



Markay Kalaay guriga ku laabato,
waxay booqataa geedka liinta.”
Miyay bislaadeen midhahaada
wali? Ayey weydisaa khalaay.



“Liinta weli waa cagaar,” ayay ku neef tuurtay Kalaay “Waxaan ku arki doonaa berrito geedka liintaw,” ayay tidhi Khalaay. “Malaha markaas baad ii yeelan doonto midho liin ah oo bislaaday!”



Storybooks Canada

storybookscanada.ca

Kalaay waxay la hadashaa dhirta

Written by: Ursula Nafula

Illustrated by: Jesse Pietersen

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](http://creativecommons.org/licenses/by/4.0/).